

Gundhigga soo koobida warbixinta



Social Cohesion Guide

Soo kobida wargelinta aasaasiga social cohesion

Soo kobida aasaaska social cohesion waa wargelin qeexo waxay haddeer u egtahay social cohesion ee Aotearoa New Zealand sida ku saleysan macluumaadka la hayo. Waxay siisaa bar bilow ah oo lagu cabbirayo social cohesion ee mustaqbalka.

Gudaha Aotearoa New Zealand, waxaa ka jira social cohesion ee bulshadeena markii dadka ku xirmaan oo dareemaan dareenka ka mid ahaanshaha, ay u suurto galeyso ka qeybqaadashada, la aqoonsanyahay oo la ixtiraamo, si simman loogu daro oo loogu amino dadka kale iyo hay'adaha kale ee dowladda.

Si loo gaaro social cohesion, meelaha ay dadka ku nool yihiin, ka shaqeeyaan, ku ciyaaraan, wax ku bartaan waa inay badqab ahaadaan, meel loo dhan yahay oo taageero leh; iyo nidaamyada iyo adeegyada bulshadeena waa inay noqdaan cadaalad oo u suurto galeyso ka jawaabida baahiyada kala duwan iyo arrimaha.

Ma jiraan hal qaab oo lagu cabiro social cohesion ee Aotearoa New Zealand, marka waa inaan isticmaalnaa illo badan oo macluumaad ah iyo xog si aan u fahamno waxa social cohesion dhabtii u egyahay. Waxaan isticmaalnay illaha xogta haddeer iyo rayi'ururinta la aruuriyay inta u dhaxeeyso 2016 iyo 2021. Guud ahaan, waxaa jiray warbixin wanaagsan ee la xiriirto social cohesion, laakiin mararka qaarkood macluumaadka ma muujineyso arimo badan oo adag ee la xiriirto social cohesion. Tusaale ahaan, macluumaadka la ururiyo marwalba looma adeegsan karo fahamka social cohesion oo kooxyada yar ee bulshada ku jirto.

Macluumaadka waxay muujineysaa in dad badan ee ku nool Aotearoa New Zealand ay leeyihiin heerar sare ee ka mid ahaanshaha, aaminaada, ka qaybgqaadasho iyo fayyo qabka. Laakiin waxay sidoo kale

muujineysaa in tani aysan aheyn waayo aragnimada dadka oo dhan. Tusaale ahaan, xogta ku saabsan Māori waxay muujineysaa inay leeyihiin heerar sare oo ka mid ahaanshaha iyada oo loo marayo qoyskooda iyo dhaqankooda, laakiin heerarka hoose ee aaminaada dowladda iyo ka qeybqaadashada yar ee waxbarashada, shaqada iyo codeynta.

Intaas waxaa dheer, macluumaadka ayaa sidoo kale muujineysa in takoorida ay caqabad weyn ku tahay wadajirka bulshada ee Aotearoa New Zealand. Kooxaha qaar ayaa la kulma heerar sare oo takoorid ah, sida dadka dib loo dajiyay (qaxootiga) iyo muhaajiriinta ka yimid Aasiya iyo Jasiiradaha Baasifiga, waalidiinta keligood ah iyo dadka shaqo la'aanta ah. Dad badan ayaa iskumar la kulma noocyo kala duwan oo takoor ah, taas oo xoojisay waayo aragnimadooda xun. Tusaale ahaan, haweenka iyo bulshooyinka jinsiga (LGBTQIA+) waxay la kulmeen takoorid sareyso guud ahaan, laakiin waxaa jiray kala duwanaansho takoorid oo ay la kulmeen dadka ka tirsan kooxahaan oo ku salaysan isirkooda ama curyaanimadooda, iwm.

Ugu dambeyntii, macluumaadka waxay muujineysaa in xilalka hoggaanka sare ee dowladda iyo adeegyada bulshada ay noqon karaan kuwo qowmiyadaha kala duwan ka muuqdan. Tan waxay si fiican uga tarjumeysaa qaybaha bulshada Aotearoa New Zealand.

COVID-19 wuxuu saameyn ku yeeshay social cohesion Aotearoa New Zealand qaabab wanaagsan iyo kuwa xunba. Tusaale ahaan, bulshooyinka waxay ku midoobeen in si wadajir ah usu taageeraan, laakiin dad badan ayaan u suurto-galeynin inay ku arkaan waji ka waji qoyskooda iyo saaxibada, iyo cudurka safmarka wuxuu kordhiyay arimaha caafimaadka jireed iyo maskaxeedba. Saameynada kale ee cudurka safmarka COVID-19 weli way soo socota.

